

# Warbixin ku socota ardayga ama waalidka mas'uulka

2020-11-05

Salaama!

Tani waa warbixin loogu tala galay ardayga dhigta dugsiga hoose/dhexe ee degmada Norrköping, dugsiga sare iyo waalidka mas'uulka ah ee leh carruur dhigata dugsiga xannaanada, kuwa hoose/dhexe ama dugsiga sare.

Waxey hey'adda caafimaadka bulshada iyo gobalka Östergötland khamiisti 29 oktoobar go'aan ku gaareen in la adkeeyo tallooyinka guud ee gobalka Östergötland. Sababta taa loo yeelayo waa in la joojiyo cudurka sida dhaqsaha leh ugu faafaya Östergötland kaasoo isku ballaariyey bushada oo dhan. Waxa la arkay iney kordhayaan dadka marka la baaray laga helay fayraska iyadoona uu faafka cudurku ku socdo jiho khalada. Taasi waxey keeneysaa culeys ku kordha goobaha daryeelka caafimaadka.

Tallooyinka guud ee la adkeeyey ayaan si gooni ah u tilmaameyn goobaha dugsiyada xannaanada ama iskuulada. Sababtuna waa iyadoo aan carruurta iyo dhalinyarada lagu arag iney u faafiyaan cudurka si xoog leh. Waxa looga gol leeyaha tallada waxa ka mida in la iska ilaaliyo isticmaalka gaadiidka dadweynaha, lagu ekaado la joogga dadka lala nool yahay oo keliya iyo inaan la qaban qaabin ama laga qeyb qaadan xaflado ama kulan ay dad badan isugu imanayaan. Tallada ayaa sidoo kale micnaheedu yahay inaan laga qeyb qaadan tababarka ciyaaraha iyo tartaranada. Carruurta iyo dhalinyarada dhashay 2005 ama wixii ka danbeeyey waxey ka qeyb qaadan karaan tababarka ciyaaraha.

Waxbarashada dugsiga xannaanada iyo tan dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa sare ayaa sidii caadiga aheyd u soconaya, balse qeybo ka mida casharada ayaa wax laga beddelayaa. Su'aalaha iyo jawaabaha isbeddelkaa waxad ka aqrisan kartaa [norrkoping.se](http://norrkoping.se).

**Waxan u baahanahay inaan dhamaanteen ka qeyb qaadano joojinta faafka cudurka! Waxan markaa ardayga iyo waalidkaba ka codsaneynaa:**

- Inaad ka qeyb qaadan ama aadan abaabulin xaflad. Isku day inaad hesho siyaabo kale ee loo kulmo. Xiriirka u beddel wicitaan ama chatt meeshi aad ka kulmi laheydeen.
- Haddii ay suura gal tahay, samee siyaabo kale ee aad ku tagi karto iskuulka. Baaskiil ama lug.
- Geey oo ka soo kaxee carruurta adigoo gudaha gilinta macquula.

- Haddii aad dhalatay wixii ka horeeyey 2005 - ka joog tababarada iyo tartaranada.

**Waxan adiga waalidka mas'uulka kaa codsaneyna inaad tixgeliso inaan la geli karin oo la booqan karin hadda goobaha waxbarashada.**

Waxa ugu muhimsan si loo difaaco adiga iyo dadka kalaba waa in la sii wadaa:

- Joogitaanka guriga haddii aad dareento calaamadaha hargabka haba yaraadaane sida diif ama cune xannuun. Maalmaha koowaad ayaad cudurka saa'id u gudbin kartaa, xataa haddii aadan dareemin xannuun.
- Orod oo isi soo baar haddii aad isku aragto astaamo yar ee cudurka.
- Ka taxadar nadaafadda. Joogto u meyr gacmaha.
- Ka fogow dadka kale.

**Mahadsanid sida aad nooga caawisay joojinta faafka cudurka!**

Warbixinta, su'aalaha iyo jawaabaha ku quseeya adiga waalidka mas'uulka waxad ka heleysaa [norrkoping.se](http://norrkoping.se). Warbixintii ugu danbeysay booqo oo ka raadso boggan:

[www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/har-du-barn-i-norrkopings-forskola-skola](http://www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/har-du-barn-i-norrkopings-forskola-skola)

Waxaa kaloo jira bog loogu tala galay adiga dhalinyarada ah. Waxaa halkaa ku urursan warbixin, xaqiiqo iyo tallo af sahlan ku qoran. Booqo boggaa:

[www.norrkoping.se/organisation/for-dig-som-ar-ung-i-norrkoping/corona-information-till-dig-som-ar-ung](http://www.norrkoping.se/organisation/for-dig-som-ar-ung-i-norrkoping/corona-information-till-dig-som-ar-ung)

Mahadsanidiin,

Adam Olofsson, madaxa goobta dugsiga xannaanada  
 Caroline Stridh, madaxa goobta dugsiga xannaanada  
 Jenny Östlund, madaxa goobta dugsiga hoose/dhexe  
 Mikael Hultberg, madaxa goobta dugsiga hoose/dhexe  
 Hans Grimsell, madaxa goobta dugsiga hoose/dhexe  
 Claes Göransson, madaxa goobta dugsiga sare  
 Jonas Eriksson, madaxa goobta dugsiga sare